# XOGURURINTA ISTICMAALKA LUUQADDA

Waalidka/Masuulka Qaaliga ah:

Ku hadlidda ka badan hal luuqad waa hanti qiime badan. Waxaanu ku boorinaa qoysaska inay joogteeyaan luuqaddooda hooyo markay baranayaan Ingiriisida. Ardayda ku hadla ama fahma luuqad labaad waxa dhici karta inay mutaystaan taageero ay ku horumarinayaan Ingiriisidooda kana caawiso buuxinta jaangoynaha tacliinta Maine. Su'aalaha soo socda, oo loo baahan yahay marka la eego dhammaan ardayda dugsiga barbaarinta ilaa fasalka 12, waxay ka caawin doonaan dugsigaaga inuu go'aamiyo haddii ay dhici karto in ilmahaagu faa'ido ka helayo adeegyada taageerada luuqadda Ingiriisida.

Haddaad jeclaan lahayd warqaddan iyo xogururinta hoose in lagugu siiyo luuqad kale, ama jeclaan lahayd tarjumaan, dugsigaaga waa aqbali doonaa codsiyadaas. Waxaad xaq sharci ah u leedahay inaad kaga hesho wixii qaabilaad ah dugsiga qaab hadal ama qoraal ah ee luuqadda aad ugu fahmi og tahay.

Haddii luuqad aan Ingiriisi ahayn hoos lagu muujiyey, ilmahaagu wuxuu dhammaystiri doonaa iskiriinarka heerka aqoonta afka Ingiriisida (ELP). Iyadoo ku xiran dadaalka ilmahaaga, ilmahaaga waxa dhici karta in loo aqoonsado Barte Ingiriisi uuna mutaysto taageerada luuqadda Ingiriisida. Waxa ballan ah in jawaabahaaga kaliya loo isticmaali doono ujeedooyin waxbarasho laguna hayn doono faylka dugsiga ee ilmahaaga, oo ay galaangal u leeyihiin shaqaalaha dugsiga oo kaliya. Shaqaalaha dugsiga looma oggola inay idin waydiiyaan xaaladda muhaajirnimo ee qoyskaaga.

Waad ku mahadsan tahay bixinta macluumaadkan waxaana u rajaynaynaa guul tacliinta ilmahaaga.

| | |
|---|---|
| Magaca Ardayga: | Taariikhda Dhalashada: |
| Dugsiga: | Dhibcaha la Saadaalinayo: |

**Fadlan su'aalna ha kaga tagin jawaab la'aan.**

1. Waa maxay luuqadda/luuqadaha ilmahaagu markii u horraysay ku hadlay ama fahmaa? ______________________________

2. Waa maxay luuqadda/luuqadaha ilmahaagu sida ugu fudud ugu hadlo ama u fahmo? ________________________________

3. Waa maxay luuqadda/luuqadaha dadku u adeegsadaan ilmahaaga maalin kasta? ___

Saxeexa Waalidka/Wakiilka: ________________________________________________ Taariikhda: ____________________

---

**Aqoonsiga Diiwaangelinta Kadib ee Dugsiga oo Kaliya Isticmaalayo**: Haddii Ingiriisidu yahay luuqadda kaliya ee lagu sheegay Xogururinta Isticmaalka Luuqadda (Su'aalaha 1-3 ee sare), iskiriinar ELP ayaa la adeegsan karaa **kaliya haddii** qaybtan uu buuxiyo macallin kadibna uu oggolaado Agaasimaha/Isku-duwaha Dadka Luuqadaha Badan ama Guddida Adeegsiga Luuqadda. Sharrax caddaynta in horumarka luuqadda Ingiriisida ee ardayga ay saamaysay luuqaddiisa koowaad ama guriga ee aan Ingiriisida ahayn:

**Saxeexa:** Macallinka ________________________________________________________ Taariikhda: _________________________

Agaasimaha/Isku-duwaha Dadka Luuqadaha Badan __________________________ Taariikhda: _________________________

GALI ASALKA DOKUMENTIGAN LA BUUXIYEY FOOLDARKA DIIWAANKA ARDAYGA EE RASMIGA AH

Aasaaska Sharci: Qaybta 3111, Xeerka Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare ee 1965